Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)

Macluumaad kusaabsan Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada ee loogu talo galay Afnaqayaasha

Information about the ICAP for Respondents

Maxaa laga wadaa Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada?

Tirada liiska alaabta loogu talo galay Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada (ICAP) waa qalab qiimayn kaas oo dad kucaawinaya go'aansashada haddii uu yahay ama uusan ahayn qofka kelida ahi mid u qalma in uu macmiil kanoqdo qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimada (DDA). Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada waa mid loo maamulay si ay u xadido haddii uu qofka codsadaha ahi leeyahay “xadad badan” sida lagu qeexay gudaha qaanuunka (WAC 388-823).

Yaa maareyn kara Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada?

Qaybta ayaa diyaarin doonta iskuna habayn doonta maareynta Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada. Qaybta ayaa go'aansan doonta qofka loo isticmaalayo sida “afnaqe” (WAC 388-823-0930).

Yaa u qalma si uu u noqdo afnaqe?

Waalid kasta, macalin ama qof daryeele ah kaas oo sifiican u garanaya qofka qiimeynta lagu sameeyay wuxuu bixin karaa macluumaada loo baahdey si uu u buuxiyo Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada. Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada waxaa buuxinaya afnaqaha kaas oo garanaya macmiilka ugu yaraan sedex bilood iyo weliba kaas oo u arka asaga ama ayada qaab-maalin- walba ah. Haddii uusan jirin qof buuxin kara qeexitaanka noqoshada afnaqe, Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada ma ahan mid la maareyn karo. Ayada oo aan jirin afnaqe u qalma, qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimadu ma ahan mid go'aansan karta xaq u yeelashada hoos imaanaysa xaalad kasta oo u baahan Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada (WAC 388-823-0940).

Imisa afnaqayaal ayay qaybtu adeegsan kartaa?

Qaybtu waxay adeegsan kartaa afnaqayaal aad u baddan intiiba loo baahdo midaas si ay u hesho macluumaad dhamaystiran oo sax ah oo kusaabsan awoodaha qofka codsadaha ah.

Manoqon karaa qofka codsadaha ahi afnaqe?

Maya. Qofka codsadaha ahi wuxuu bixin karaa macluumaad laakiin weligiisa manoqon karo afnaqe u qalma.

Mayahay qofka codsadaha ahi mid laweydiinayo si uu uga jawaabo su'aalo ama u cadeeyo qaar hawlaha kamid ah?

Qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimadu way latashan, indha indhayn doontaa, ama weydiin doontaa qofka codsadaha ahi si uu u cadeeyo qaar hawlaha kamid ah si loo ansixiyo jawaabaha.

“Waxyaabaha kusalaysan qiyaastaada macluumaada ku aadan ama indha indhaynta gudashada macmiilka hawlaha lamidka ah ama laxariira.” (buuga Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada, Lifaaqa D, bogga 153)

“Si natiijada loo ansixiyo, waxaa lagama maarmaan ah in macluumaadka ladiiwaan geliyay katurjumayso dabeecada macmiilka runta ah ee xaaladaha caadiga ah. Macluumaadka waxaa laga heli karaa buug yaraha Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada, macluumaadkaas oo ka ahaaday wareysiyaasha lagu isticmaalo buug yaraha, ama xitaa ka ahaaday weydiinta macmiilka si uu u guto shayga. Ma ahan mid loogu talo galay midaan in ay ahaato gudasho imtixaan, laakiin, haddii ay lagama maarmaan noqoto, waa mid kuhaboon in la isticmaalo war gudashada ayada oo laxariirto macluumaadka uu bixiyay afnaqaha." (Febraayo 26, 2003, imayl kayimid Brad Hill kuna socda Qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimada)

Maxaa looga baahanyahay afnaqaha in uu sameeyo?

Afnaqaha waxaa looga baahanyahay in uu kajawaabo hadal qoraal kasta oo kusugan Tirada liiska alaabta Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada uguna jawaabo hal ama afar jawaabood taas oo sifiican u qeexaysa kartida qofka. Inta soo socota waa khulaasada jawaabahaan:

Weligeed ama Dhif ah (0) Waxay tilmaamaysaa in hawshu ay tahay mid aad u adag, ama in uu qofku yahay mid aan loo ogolaanin in uu sameeyo hawsha sababtoo ah ma ahan mid ammaan ah. Qofka weligiisa ama mar dhif ah ayuu gudanayaa dhammaan qaybaha hawsha ayada oo aan jirin caawimaad xitaa hadii loo baahdo.

Qabtay, Laakiin Ma ahan Sifiican (1) Qofka mararka qaar wuxuu gudanayaa hawsha asaga oo aan haysan cid caawisa laakiin uma gudanayo si fiican. Inkastoo asaga/ayada ay iskudayay in uu sameeyo dhammaan qaybaha hawsha asaga oo aan haysan wax caawimaad ama horjooge ah, natiijaduna ma ahan mid fiican. Waa caadi haddii asaga/ayada u baahantahay in laweydiiyo ama lasoo xasuusiyo. Qofka wuxuu shaqada qabtay kudhowaadkii boqolkiiba 25 oo wakhtiga ah.

U qabtay si Fiican (2) Qofku wuxuu u gutey hawsha si macquul ah oo wanaagsan asaga oo aan haysan caawimaad ama horjooge. Inkastoo uusan u gudan hawshu si dhamaystiran oo wanaagsan, asaga/ayada wuu samayn karaa dhammaan qaybaha hawsha. Waa caadi haddii asaga/ayada u baahantahay in laweydiiyo ama lasoo xasuusiyo. Qofka wuxuu shaqada qabtay boqolkiiba 75 oo wakhti ah.

U qabtay si Aad u Fiican (3) Waxay tilmaamaysaa madaxbanaani buuxdo oo aan waxna lagu tiirsanayn. Qofka ama wuxuu sifiican u qabtay xirfada, ama xirfadu waa mid aad ugu fudud asaga/ayada. Qofka wuxuu hawsha u qabtay si buuxda oo aad u wanaagsan asaga oo aan wax caawimaad ah ama horjoog ah kahaysan qofna wuxuuna garanayaa marka ay tahay lagama maarmaan in hawlaha laqabto ayada oo aan laweydiinin ama lasoo xasuusin. Asaga/ayada wuxuu u qabtay hawsha si aad u fiican--markasta ama kudhowaadkii markasta.

Mayihiin qeybaha Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada ee Laqabsashada Dabeecada kuwo qiimeeya mushkiladaha dabeecada?

Maya. Qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimadu ma ahan mid qiimeysa dabeecadaha marka laxadidayo xaq u yeelasho. U jeeddada Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada wuxuu yahay in laqiimeeyo xirfadaha laqabsashada ee meelaha xirfadaha dhaq-dhaqaaqa, xirfadaha noolaanshaha shakhsiga ah, xirfadaha bulshada iyo xiriirka, iyo xirfadaha la noolaanshaha jaaliyada.

“Qeybta laqabsashada dabeecada ee Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada waxay diiradu saaraysaa awooda.Qof kaas oo, haddii uu daalo, gaajoodo ama mararka qaarna deg-dega oo diidaya in uu guto hawsha weli waxaa dhici karta in qiimeyn lagu sameeyo‘Sifiican u qabtay asaga oo aan laweydiinin’ haddii xirfadu ay kujirto qofka awoodiisa kadibna inta baddan loo guto sifiican. Haddii ay diidmadu tahay mid joogto ah laakiin lagu dabakhi karo keliya hawlo xadidan oo yar, inta baddan waxay hal dhibic kayarayn kartaa qiyaasta dabeecada macmiilka oo kusaabsan waxyaabahaan xadidan.

Dabeecadaha soo dhex gala hawlaha macmiilka maalin-laha-ah ama hawlaha dadka asaga/ayada hareerihiisa ah waa in ay noqdaan kuwo loo qiimeeyo sida mushkilado dabeecad, ma ahan sida ayada oo aan jirin dabeecad laqabsasho ah. Diidmo ah in laguto hawlaha waajibaadka ah kuwaas oo kujira awooda qofka, marar qaar loo yaqaano aan-u hoggaansanayn ama dabeecada aan wada shaqaynin, waxaa dhici karta in lagu diiwaan geliyo qeybta mushkilada dabeecada ee Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada haddii diidmadu ay tahay mid caadi ah oo kufilan in ay samayso mushkilad joogto ah taas oo gaarta xirfado baddan oo laqabsasho ah. Xaaladaan oo kale macmiilka wada shaqayn la'aantiisa ma ahan mid hoos u rideysa dhibcaha qalabka asaga/ayada dabeecadeeda laqabsashada, taas oo lagu qiyaasi doono asalka awooda aan ahayn wadashaqayn."

[Ayada oo sitoos ah uga timid Brad Hill“Heerarka degan ee Buuxinta Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada/SIB-R Cabirka Laqabsashada Dabeecada” (http://www.cpinternet.com/~bhill/icap/)]

Maloo baahanyahay in uu joogo qofka codsadaha ahi inta lagu guda jiro buuxinta Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada?

Qofka codsadaha ahi waxaa looga baahanyahay in uu joogo lana heli karo ugu yaraan qayb wareysiga kamid ah. Qofka codsadaha ah iyo afnaqaha ayaa dooran kara in ay uga jawaabaan si khaas ah ama ayada oo joogaan dadkale oo kaqayb qaatayaal ah. Aadbey muhiim u tahay in uu afnaquhu bixiyo macluumaad sax ah sidaas daraadeed afnaquhu waxaa looga baahanyahay in uu kusoo wargeliyo qaybta haddii ay jiraan wax kacelinaya in ay runta sheegaan oo ay daacad noqdaan.

Sidee loo keenaa dhibcaha Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada?

Jawaabaha Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada waxaa lageliyay kombuyuutar. Barnaamij kombuyuutar ah ayaa xisaabaya heerka dhibcaha mid kasta oo kamid ah qeybaha afarta xirfadood ee laqabsashada, ayada oo xisaabtana lagu darayo qofka codsadaha ahi da'diisa.

Siduu u saamayn karaa qaraarka xaq u yeelashada ee Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada?

Marka ay Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaaladu u baahato sida daliil oo kale xadad baddan oo xaq uga yeelanaya qaybta Maareynta Horumarinta Curyaanimada, Dhibicda u qalmida waa in ay noqotaa meesha ama hoosta dhibicda majaalka iskufilnaanta buuxda kuna xadidan da'ada macmiilka/codsadaha (WAC 388-823-0900).

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)
MACLUUMAAD KUSAABSAN TIRADA ALAABTA LIISKA MACMIILKA IYO QORSHAHA WAKAALADA EE LOOGU TALO GALAY AFNAQAYAASHA

Qoraalka Fahanka
Declaration of Understanding

JAWAAB CELIS: Codsade _____

Anigu waxaan akhriyay oo aan fahmay “Macluumaada kusaabsan Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalada ee loogu talo galay Afnaqayaasha.”

Waxaan helay “Heerarka degan ee Buuxinta Tirada alaabta liiska Macmiilka iyo Qorshaha Wakaalad/SIB-R Cabirka Laqabsashada Dabeecada.” https://www.dshs.wa.gov/sites/default/files/FSA/forms/pdf/16-182.pdf

Waxaan fahmay in jawaabaha aan anigu bixiyay ay khasab tahay in ay noqdaan kuwo sax ah loona isticmaali doono qiimeynta xadad baddan oo loogu talo galay xaq u yeelashada Maareynta Horumarinta Curyaanimada.

Anigu waxaan fahmayaa in qofka lagu sameeyay qiimeynta laga yaabo in uu buuxiyo ama uusan buuxin cabirka xaq u yeelashada Maareynta Horumarinta Curyaanimada.

Anigu waxaan haystay fursad kasta oo su'aalo lagu weydiin karey su'aalahayga dhammaana waa la iiga jawaabay weliba raali ayaan ku ahay.

SAXIIXA AFNAQAHA	TAARIIKHDA
WAKIILKA MAAREYNTA HORUMARINTA CURYAANIMADA/QAYBTA ADEEGAHA BULSHADA IYO DARYEELKA CAAFIMAADKA	TAARIIKHDA

Xusuusnoow: Diidista in lasixiixo Qoraalkaan waxay qofku kareebaysaa u tixgelintiisa in uu ahaado sida “afnaqe”.

Qaybin:
Nuqul loo dirayo Afnaqaha
Nuqul loo dirayo Qaataha Faylka